

Qaangaarka naafada ah ee wax qaban kara ee ku nool guryahooda waxay iskood-u-maareyn karaan hawlaha la xiriira caafimaadkooda.



Waa maxay Xannaano Iskaa-u-Maaree ah?

Waxaan qabanaa hawlo daryeel-caafimaad baddan kuwaas oo laga qoray dhinaca xirfadle daryeel caafimaad oo anaga la inoogu talagalay. Waxaan furnaa dhalo ay ku jirto daawo dhakhtar soo qoray oo waxaan daawadaas u qaadannaa sidii uu dhakhtarku u soo amray inaan u qaadanno. Waxa laga yaabaa inaan leenahay dhibaato caafimaad oo muddo soo jirtay sida kaadi-macaan amase sokorow, oo waxaan xilli xilli u fiirinaa heerka sonkorta ee dhiiggayaga. Hawlaha kale ee xannaano caafimaad waxa ka mid ahaan kara barnaamijyo gaar ah oo saxarada ah, tuubbo-gelinta kaadi-haysta, amase xannaano meel boog ah.

Hase ahaatee, maxaa dhici kara haddii naafanimu hawleed ka celiso qof qaangaar ah inuu sameeyo hawl xannaano-caafimaad ah oo uu caadi ahaan sameyn jiray? Qofka qaangaarka ah ee naafada ihi wuxuu xilligan dooran karaa inuu maareeyo amase kormeero qof kaaliye shakhsi ah oo lacag la siiyo amase Qof Bixiye ah (IP) inuu hawshaas u sameeyo. (Kaaliye ay lacag siiso hay'ad xannaano guri ma sameyn karo shqooyinkaas.) Sannadkii 1999 ayaa la meel-mariyey sharci (HB 1880, Gobolka Washington) dhidbaya xaqan ah xannaano is-maareyn ah.

Haddii aad leedahay naafanimu, amase aad ku nooshahay gurigaaga, amase aad tahay 18 jir, ama ka weyn oo aad dooneysid inaad iskaa-u-maareysid xannaanadaada caafimaad, waxaad mas'uul ka tahay waxyaalaha soo socda:

- ▶ Waa inaad u sheegtaa dhakhtarkaaga amase khabiirkaaga xannaano caafimaad ee kuu qoray daaweynta inaad adigu rabtid inaad maareyso kaaliye shakhsi amase qof bixiye ah (IP) inuu sameeyo hawshaas iyada ah.
- ▶ Waa inaad adigu leedahay aqoontii iyo kartidii loo baahnaa inaad tababbarto qof inuu sameeyo hawlahaas.
- ▶ Waa inaad adigu tababbartaa kaaliye shakhsi amase qof bixiye ah (IP) inuu sameeyo hawlahaas.
- ▶ Waa inaad adigu kormeertaa wax-qabadka kaaliyaha shakhsi amase qof bixiyaha ah (IP).

Haddii aad heshay maal-gelin dawlad,

- ▶ Waxaad hubisaa in qofka bixiyaha ihi uu helo koobbi qorshahaaga adeeg.
- ▶ Maamulaha kiiskaaga amase shaqaalahaaga bulsho waxaad siisaa magaca qofka bixiyaha ah (IP) amase kaaliyahaaga shakhsiyadeed. Maamulaha kiiskaaga amase shaqaalahaaga bulsho wuxuu oggolaan doonaa bixiyahaaga. Xafiiska DSHS wuxuu sameyn doonaa soo-baaris taariikh dembi ee kaaliye shakhsi, wuxuuna meel diiwaan ah ku haynayaa magacyada kaaliyayaasha shakhsi ee lagu helo inay ku tacaddiyeen amase xumeeyeen, amase dayaceen, amase si xun uga ka-faai'deysteen dad. Xafiiska DSHS lacag ma siin doonno bixiyayaal iska leh taariikh dembi.

Su'aalo?

Wixii macluumaad
intan dheer kala xiriir
Maamulka Taageerada
Muddada-Dheer
iyo Da'weynaanta
lambarkan:
1-800-422-3263 sii
wareejinta 5-2559
TRS: 711 ama
1-800-974-1598

RESORTED
STD.
U.S. POSTAGE PAID
Olympia,
Washington
Permit No. 297



Transforming lives

DSHS 22-388 SM (Rev. 8/19) Somali

Washington State Department of Social and Health Services
Aging and Long-Term Support Administration
P.O. Box 45600
Olympia, WA 98504-5600

Waxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa fursad la mid ah qofka loo shaqeeyo mana ahan mid dadka ku takoorta qaabab ku dhisan da'da, nooca, jihey galmo, nooca qofka, aqoonsiga qofka/fikir cabirasho, xaalad guur, jinsi, diin, midab, asal dhalasho, diin iyo waxyaabaha uu qofku rumeysanyahay, u iilasho siyaasadeed, xaalad ciidan, halyeeynimo dagaal hore oo u fadhiistay si sharaf leh, Casrigii Fiiitnaam, wakhti dhow laga saaray ama xaalad halyeeynimo la ilaaliyay kale, jiritaanka naafonimo araga, maqalka, maskaxda ama jirka ah, ama isticmaalida eey tababaran oo loo adeegsado hagiid ama adeeg xayawaan uu isticmaalo qof naafo qabba, lacag bixin loo simanyahay ama macluumaad hidde.

Xannaano Is-Maareyn ah

Sida uu Sharcigan
Xuquuqda Madaniga
ah ee Dawladda
Washington Adiga
kuu Saameyn Karo



Aging and Long-Term
Support Administration

Washington State Department
of Social and Health Services